الدكتور عائض القرني

DAABACAADDII 1-AAD

WAXAAD NOQON KARTAA

# HAWEENAYDA UGU FARXADDA BADAN ADUUNKA



Tarjumiddii :-
cabdijabaar axmed cabdiraxmaan

Waxaad noqon kartaa

# Haweeneyda Ugu Farxada Badan Aduunka

TIKTOK: @SomaliBookTok

TIKTOK: @SomaliBookTok

Waxaad noqon kartaa

# HAWEENEYDA UGU FARXADA BADAN ADUUNKA

أسعد امرأة في العالم

Dr. ‘Â’iḍ al-Qarni

Tarjumiddii:-
Cabdijibaar Axmed Cabdiraxmaan

JAABIR PRINTING PRESS

TIKTOK: @SomaliBookTok

**Magaca Buugga: Haweeneyda Ugu Farxada Badan Aduunka**

**Qoraagga:- Caa'id Al Qarnii**

**Tarjumidda:- Cabdijibaar Axmed Cabdiraxmaan**

**Daabacaaddii 1aad:- 2024**

**Madbacadda:- Jaabir Printing**

**TUSMADA KITAABKA**

FARIINTA TARJUMAHA....13

HIBEYN....15

HORDHACA TARJUMAHA....16

HORDHAC....18

**CUTUBKA 1AAD....23**

SOO DHAWOOW!....25

HAA!....26

MAYA!....27

TABAN FIKIR OO AY TAHAY INAAD KU FIKIRTO....29

KA FIKIR…....31

**CUTUBKA 2AAD....33**

HAWEENAYDII KA HORTIMID DULMIGA....35

WAXAAD HANTI AHAAN U HAYSATAA BARAKO BADAN....37

WAXAA SHARAF KUUGU FILAN INAAD MUSLIN TAHAY....39

HAWEENKA ILAAHAY RUMEYSAN IYO HAWEENKA AAN ILAAHAY RUMEYSNEEN MA AHAN KUWA SIMAN....41

CAAJISKU WAA QARAABADA GUUL-DARADDA....43

MALAAYIIN DUMAR AH BAAD KA WANAAGSAN TAHAY....45

NAFTAADA UGU DHIS QASRI KU YAALA JANNADA DHEXDEEDA....47

QALBIGAADA HA KU BURBURININ GACMAHAAGA....49

WAXAAD LA MACAAMILAYSAA RABBIGII UGU NAXARIISTA IYO DEEQSINIMADA BADNAA....51

WAXAAD NOQON DOONTAA GUULEYSTAHA XAALAD KASTA....53

TIKTOK @SmaliBook1ok

**CUTUBKA 3AAD .....55**

TIRI NIMCOOYINKA ALLE KUGU MANAYSTAY .....57

WAX YAR OO KU FARAX GELIYA AYAA KA WANAAGSAN WAX BADAN OO KU DHIBA.....58

EEG DARUURAHA OO HA EEGIN DHULKA.....59

BUUL LAGULA NOOLAADO IIMAAN AYAA KA ROON DAAR LAGU GAALEEYSAN YAHAY .....60

MAAREE WAKHTIGAAGA SI AAD U SAMAYSO WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD SAMEYSO.....61

FARXADDEENU MAAHA SIDA TOODA OO KALE.....62

SOO FUUL MARKABKA BADBAADADA .....63

FURAHA FARXADDU WAA SUJUUDDA .....64

DUMARKII HORE WAXAY DHALI JIREEN GEESIYAAL.....65

SI AAD U NOQOTO HAWEENEYDA UGU QURUXDA BADAN ADDUUNKA.....66

**CUTUBKA 4AAD .....69**

WAXAAD TAHAY QOF XASUUS IYO MAAMUUS MUDAN.....71

AQBAL DUCADA OO SIDA UGU FIICAN UUGA FAA'IIDAYSO ...73

ARZAAQDA BADAN WAXAY KU TIMAADAA .....75

IN CAFIS LA RAADIYO .....75

DUCADA WAXAY YARAYSAA MURUGADA.....77

ISKA ILAALI RAJO-XUMADA IYO NIYAD-JABKA .....79

GURIGAAGU WAA BOQORTOOYO GUUL IYO JACAYL.....81

WAQTI UMA HAYSATID HADAL AAN MACNO LAHAYN.....82

QALBIGA KA FARAX OO CAALAMKU WUU KU SOO DHAWEYN DOONAA.....84

MA JIRO QOF MARWALBA SI BUUXDA U FARAXSAN .....86

TikTok: @SomaliBook Tok

GAL BEERTA AQOONTA....88
**CUTUBKA 5AAD ....89**
XUSUUSNOW ILMADA DAATAY IYO QALBI JABAY....91
DADKANI MA FARAXSANA....92
WADADA ALLE AYAA AH WADADA UGU FIICAN....93
MARKAY ARRIMUHU NOQDAAN KUWO AAN LOO ADKAYSAN KARIN, ALLE U NOQO....95
MAALIN KASTA KA YEEL BILOW CUSUB....97
DUMARKU WAA SIDA XIDDIGAHA CIRKA....99
GEERIDU WAXA AY KA ROONTAHAY IN LA SAMEEYO CAMAL XAARAAN AH....101
AAYADO DHIIRI GALIN LEH....103
GARASHADA EEBAHA RAXMAANKA AH AYAA MURUGADA BAABI'ISA....105
MAALINTA BARAKEYSAN....107
**CUTUBKA 6AAD ....109**
HAWEENAY CAQLI LIHI WAA ISHA NOLOSHA FARXADEED..111
KA TAXADAR MAANTA OO KALIYA....113
HA DAREEMIN IN QOF KASTAA U SOO BAXAY INUU KU HELO....115
WAXAAD LA QABSAN DOONTAA XAALADDAADA OO WAAD KA ADKAAN DOONTAA....119
TALO WANAAGSAN OO KA TIMID HAWEENEY CAQLI BADAN LEH....121
NAAG NAFTEEDA U HURTAY OO SIDAAS KU KASBATAY RAALLI AHAANSHAHA RABBIGEED....123

@SomaliBookTube

WAY KU DHEGGANTAY AWAAMIIRTII ALLE, ALLENA WUU DHAWRAY....125
BIYAHA TAWBADA WAA BIYAHA UGU NADIIFSAN....127
HALGAMAAGII UGU HOREEYEY EE XORIYADA....129
**CUTUBKA 7AAD....131**
EEBAHAA TALO SAARO....133
INDHO LA'AANTA QALBIGU WAA INDHO LA'AAN DHAB AH....135
HA ISKU DAYIN INAAD AASAASTO MAXKAMAD AARGOOSI AH, WAAYO WAXAAD NOQON KARTAA DHIBBANAHA UGU HORREEYA....137
KALA SOOCIDA WAXA LAGU KASBADAA GUUL....139
DUNIDA KUFRIGA ( GAALNIMADA ) WAXAY LA IL DARAN TAHAY DARXUMO....140
DABEECADDA LAMMAANAHA NOLOSHA....142
KU QANACSANOW WAXA ALLE KUU QADDARAY....143
HA DAREEMIN WAX QOOMAMO AH ADUUNKAN....145
QURUXDA UGU YAABKA BADAN WAXAY KU JIRTAA ABUURISTA ALLE....147
SHARAFTA UGU DAMBEYSA....149
IYO DEEQSINIMO AAN XAD LAHAYN....149
**CUTUBKA 8AAD....151**
MA LIHID MEEL AAD U JEEDSATO OON AHAYN DHINACA ALLAAH MOOYEE....153
FARXAD WAY JIRTA... BALSE YAA HELI KARA?....155
DABEECADDA WANAAGSANI WAA BARAKO WEYN....156
SIDEE LOO GAARAA NOLOL FARXAD LEH....159

ALLA KA MAGAN GAL WALWALKA IYO MURUGADA .....161
HAWEENAYDII TAAGEERADA LA TAAGNEYD WAQTIYADA DHIBAATADA .....163
HAWEENAY KA MID AHAYD EHLU-JANNADA .....165
SADAQADU WAXAY KA ILAALISAA BALAAYADA .....167
NOQO QOF LEH RUUX QURUX BADAN MAXAA YEELAY KOONKU WUU QURUX BADAN YAHAY.....169
HAWEENEY GEESIYAD AH.....171
**CUTUBKA 9AAD .....173**
HA KU BIXIN WAKHTIGAAGA ADIGO AAN WAXBA SAMAYNEENIN .....175
FARXADA LAGUMA IIBSAN KARO LACAG.....176
QOFKA NIYAD-JABKA BADAN WAXA UU ABUURAA JAWI NIYAD-JAB AH .....178
KA FOGOOW CABASHADA IYO NIYAD JABKA.....180
DHIBAATOOYINKA BADANKOOD WAXAY LEEYIHIIN SABABO YAR YAR.....182
XAKAMEYNTA CARABKA.....184
KULA DAGAALAM WALAACA SALAAD TUGASHO.....186
TALADA HAWEENAY GUULAYSATAY.....188
QOFKII AAN ALLE AGTIISAA RAAXO KA HELIN, WAX KALE RAAXO KAMA HELO .....190
IYADU WAXAY KU NOOLAYD LABA NOLOLOOD .....192
**CUTUBKA 10AAD .....195**
RUMEEY QADARTA IYO AMARKA ALLE, XUMAAN IYO SAMAANBA .....197
UMUURAHA WAXAA UGU FIICAN KUWA DHEXDHEXAADKA AH .....199

DEGDEGA IYO KA FIIRSASHO LA'AANTU WAA SHIIDAALKA DARXUMADA.....200
CIYAARTA HANTI URURSIGU DHAMMAAD MA LEH .....201
ANSHAX-XUMADA WAXAY KA DHALATAA CAAJISKA.....203
GURI AAN XANAAQ, BUUQ IYO DAAL LAHAYN .....205
DHAWRSANAANTA IYO XISHOODKU WAXAY KORDHIYAAN QURUXDA.....206
QOFKII MAQANNA ALLE HA KU SOO CELIYO GURIGIISII .....208
HAL WEEDH AYAA LAGA YAABAA INAY BUUXISO WAQTI IYO MEEL BANNAAN.....210
QULUUB JANNO U HILOOBAY.....212
**CUTUBKA 11AAD .....215**
WAA KUMA GACALIYAHA KUUGU QAALISAN? .....217
FARXADDU WAX SHAQO AH KUMA LAHAN HODANNIMADA AMA FAQRIGA.....219
MIYAANU EEBE UGA MUDNAYN MAHADINTA DADKA KALE? .....221
HAWEENAYDA FARAXSANI WAXAY KA FARXISAA DADKA KU HAREERAYSAN .....223
QANACSANOW, WAX WALBA WAXAY KU DHACAAN IDAMKA IYO QADARKA ALLE.....225
UMMU CAMAARA AYAA HADLAYSA.....227
NAXARIISTA DADKA KALE WAXAY TIRTIRTAA MURUGADA 229
KHASAARAHAAGA U BEDDEL FAA'IIDOOYIN .....231
DAACADNIMADU AAD BAY QAALI U TAHAY; AAWAY KUWII DAACADDA AHAA? .....233
NOQO QOF AY WAX WALBA DHAB U QABTA.....235

**CUTUBKA 12AAD .....237**

ISKA JIR!.....241

IN LOO MAHADCELIYO QOFKA LAGA FAAIIDAYSANAYO WAA WAAJIB .....242

NAFTU WAXAY MUDAN TAHAY DARYEEL KA BADAN JIDHKA .....244

KU MASHQUUL WAKHTIGA XAADIRKA AH INTII AAD KA MASHQUULI LAHAYD TAGTADA AMA TIMAADA .....245

MASIIBOOYINKA WAA HAB LAGU GAARO RABITAANNADA 247

U NAXARIISO KUWA DHULKA JOOGA ADIGANA KAN JANNADA HAAYA AYAA KUU NAXARIISAN DOONA .....249

DUNIDA QURUXDA BADAN WAXAA ARKA OO KALIYA KUWA RAJADA LEH.....251

ALLAH GARAWSO WAQTIYADA FUDFUDUD, ISAGANA WUU KUU GARGAARI DOONAA XILLIYADA ADAG .....253

NAAGTII UGU MEHER SAREYSAY ADUUNKA.....255

**CUTUBKA 13AAD .....257**

FURAYAASHA GUUSHA.....259

SILICA KA DIB WAXA TIMAADDA FARXADDA GUUSHA .....260

WALAACA AYAA DAALIYA JIDHKA IYO MASKAXDA .....262

SHAQADA AAD JECESHAHAY AYAA AH SIRTA FARXADDAADA .....264

XOOGGU WAXA UU KU JIRAA RUUXDA EE KUMA JIRO JIDHKA .....265

HAWEENAY XIKMAD BADAN AYAA CADAABTA MASIIBADA U BEDDESHA JANNO.....267

U SAMIR INAAD GUULAYSATO.....268

MARKA DHIB LAGU JIRO, MA HAYSANNO MEEL AAN KA MAGAN GALO OON AHAYN ALLAAH KELIYA .....270

MIYUUSAN AHAYN (MID KA ROON ILAAHYADIINNA) KAN A AJIIBA DUCADA KAN DHIBBAN MARKUU BARYO. .....272

RUUXII CESHTANA WUXUU UUN KA CESHADAY [FAA" IIDADA] NAFTIISA. .....274

**CUTUBKA 14AAD .....277**

WAXAA TAHAY HAWEENAY MUSLIMAD AH.....279

ISKA ILLOW WAXA KU MURJINAYA, OO BILOW INAAD NAFTAADA MASHQUULISO .....281

QODOBBADA KAA CAAWINAYA INAAD HESHO FARXAD .....283

ADKEEY XIRIIRKA AAD LA LEEDAHAY ALLAAH MARKA AY DHAMMAAN KUWA KALE FASHILMAAN.....285

MA JIRO QOF KA FARXAD BADAN KUWA ALLE RUMEEYAY...286

NOLOL AAN XAD-DHAAF IYO RAAXAYSI LAHAYN .....288

SAMAYNTA FALALKA SAXAN WAXAY KA FARXIYAAN QALBIGA .....290

DHIB KASTA ALLE WUU NAGA BADBAADIYAA .....291

ISKA JIR DAYACAAD .....293

U DHOOLA CADDEY NOLOSHA .....295

## FARIINTA TARJUMAHA

Mahad oo dhan, iyo mudnaanba waxay Usugnaatay Allaha wayn ee ah Eebaha Caalamka; dhammaan salaadda iyo Naxariistaba ha ahaato Nabigeena Muxamed korkiisa, Ehelkiisii, Asxaabtiisii iyo intii raacdaba.

Asigoo ka duulaya nimcada Islaamka, qiyamkeeda iyo mabaadiideeda, qoraaga haweenayda ugu farxadda badan, Dr. Caa'id al-Qarni, oo leh waayo-aragnimadiisa hodanka ah iyo aqoonta ballaadhan, ayaa buugan ku soo ururiyey talooyinka akhlaaqda iyo hab-dhaqanka ee qiimaha badan. looguna talagalay in lagu sugo wanaagga haweenka muslimiinta ah.

TikTok: @SomaliEBook Tok

Talooyinkani waa gunaanadyo badan oo isugu jira aayado qur’aan ah, murti nabi ah, waano daacad ah, qiso dhab ah, aragtiyo laga fikiray iyo tijaabooyin la aamini karo oo haweenka ku hagi kara dariiqa toosan ee u horseedaya raaxada, qanacsanaanta, kalsoonida, jacaylka iyo farxada if iyo aakhiraba.

Ku-dhaqanka taxaddarka leh iyo dabaqitaanka nuxurka buuggan, ka dib markii la rumeeyo Eebbe oo la weydiisto magangalkiisa waqtiyada fudud iyo waqtiyada dhibaatooyinka labadaba, hubaal waxay caawin doontaa

akhriste kasta, keliya maaha inuu gaaro ujeedooyinka aasaasiga ah ee kor ku xusan, laakiin sidoo kale inuu ka mid noqdo dumarka aduunka ugu farxada badan.

Allaah Subxaanahu Wa Tacaalaa, Dr. Al Qarni ha ka abaal mariyo dadaalkii wanaagsanaa ee uu sameeyay, una barakeeyo intii gacan ka geysatay soo saarista shaqadan, akhristayaashana ha u sahlo inay uga faa'iideystaan sidii loogu talagalay. Amiin (Ilaahay ha naga aqbalo).

TIKTOK: @SomaliBookTok

## HIBEYN

Haweenay kasta oo muslimad ah oo ku qanacsan inuu Eebbe Rabbigeed yahay, Islaamkuna diinteeda tahay, Muxammadna naxariis iyo nabad gelyo korkiisa ha ahaatee) uu nebigeeda yahay.

Gabar kasta oo raacda dariiqa runta ah, ee xanbaarsan fariinta xaqqa ah.

Macalimad kasta oo ku dadaasha inay hadalkeeda ku gudbiso aqoonta iyo qiyamka, nafteedana daahirisay.

Hooyo kasta oo caruurteeda ku tarbiyadaysa cabsida Alle iyo inay sunnada raacdo, khayrkana ka dhiga.

Haweenay kasta oo werwer iyo murugo ku raran tahay.

Ku farxa oo ku bishaaree jidkii aad gacanta ugu jirtay, daryeelka Alle, ajar weyn iyo dembi dhaaf.

TIKTOK: @SomaBook

## HORDHACA TARJUMAHA

Raadinta farxadda - waa wax ina wada khuseeya, iyada oo aan loo eegin meesha aan ku noolnahay ama meesha saldhigga nolosheenuu ay tahay. Buuggan, Dr. Caa'id al-Qami waxa uu ku baadhayaa waddada loo maro farxadda. Isaga oo ka duulaya manhajka Islaamka iyo hadallada xikmadaysan ee culimaddii muslimiinta ahaa ee soo noolaa qarniyaddii tagay, iyo codadka khubarada iyo dadkii nolosha heerka sare ka gaaray ee bari iyo galbeedba, waxa uu ku iftiimiyay xaqiiqooyin qotodheer oo kooban oo si fudud loo fahmi karo oo qof kasta uu u heli karo waqti uu ku akhriyo. si kasta oo ay noloshiisa mashquul u tahay.

Run ahaantii waxa uu si cad u sheegay in nolosha adduunku aanay weligeed taam noqon doonin (dabcan taasi waxa ay ku dhici doontaa Jannada dhexdeeda), balse anagoo ku tashanayna awooddeenna, sidoo kalena kaashanayna Alle, waa in aan ka faa'iidaysanno waxa aan ku haysanno Aduunyada oo aynu gaadhno heer lagu qanco iyo raynrayn si kasta oo ay nolosheenu tahay.

Waxaa jira casharo muhiim ah oo laga baranayo halkan: iimaanka, rajada, dulqaadka iyo aqbalaadda ... marna ha dhayalsan awoodda dhoola cadeynta.

TIKTOK @SomaliBookTok

Kani waa buug fiican oo loogu talagalay haweenka mashquulka ah, iyada oo aan loo eegin doorka ay ku leeyihiin nolosha, hadday yihiin xaasaska, hooyooyinka ama haweenka shaqeeya (ama saddexdaba), waa buug ka kooban tuducyo gaagaaban oo degdeg ah oo kuu horseedaya xaqiiqooyin waaweyn. Hadda qabso "buuggaan cajiibka ah", laakiin ha ilaawin inaad dib ugu noqoto dhaxalka buugaagta Islaamiga ah si aad si qoto dheer uga hesho aqoontaada fikradaha halkan lagu sheegay.

Alle ha ka abaalmariyo qoraaga shaqaddan muhiimka ah ee uu qabtay iyo sida uu casharkan muhiimka ah ugu soo gudbiyay dadkan wada mashquulka ah.

TIKTOK: @SomaliBookTok

## HORDHAC

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha koonkan uumay, naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaato Rasuulka Alle iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo intii raacday.

Kitaabku waxa uu ku baraarujinayaa gabadha muslimada ah in ay ku farxdo diinteeda iyo nimcada Alle ku manaystay. Waxay u keentaa rajo iyo bishaaro qof kasta oo dareema murugo, niyad jab iyo culays badan. Waxay ku martiqaadaysaa haweeneyda muslimadda ah inay filato waddo ay kaga baxdo oo ay rajaynayso inay u fududaato dhibaatada ka dib. Waxay la hadlaysaa maskaxdeeda suuban iyo qalbigeeda saafiga ah, iyadoo u sheegaysa in ay sabirto oo ay ajar Alle ka doonto, ha quusan, ha quusan, ha niyad jabin, ha niyad jabin, illeen Alle baa kula jira, Alle ayaa kugu filan, kuna ilaalinaya.

TIKTOK @SomaliBook TV

Walaashay akhri kitaabkan, waayo waxa ku jira aayado qur'aan ah oo cad cad oo aan madmadow ku jirin, axaadiis dhab ah, fikrado toosan, qisooyin dhaxal gal ah iyo xikmad ku dhisan in la adeeco. Akhri buugan oo iska ceyri raadadka murugada, qarowga, cabsida iyo welwelka. Akhri buugan si uu kaaga caawiyo in aad maskaxdaada ka nadiifiso khayaalinimada iyo shaydaanka, oo ku tuso dariiqa aad ku heli karto

xasilooni, iimaan, farxad iyo raynrayn. Alle ha ku siiyo farxad adduun iyo mid aakhiro, nimcadiisana ha ku siiyo, illeen waa deeqsi oo naxariis badan.

Waxaan buuggan u soo bandhigay sidii sunduuq hantiyeed oo ay ka buuxaan fikrado qurux badan oo aad noloshaada ku qurxin karto. Waxa ku jira luul qurux iyo run isugu jira oo ka sarreeya sasabka quruxda badan ee dahabka iyo qalinka.

Haddii aad gacantaada ku haysato buuggan, waa inaysan dan kaa gelin qurux adduunyo, quruxda madhan, muuqaaladda beenta ah ama moodooyinka ku meel gaadhka ah. Ku qurxi buuggaan oo aad u xidho dhammaan xilliyada kala duwan ee nolosha, xilli kasta oo farxad iyo damaashaad ah, si aad u noqoto - haddii Eebbe idmo - haweenayda ugu farxadda badan adduunka.

TIKTOK @SomaliBook Tok

Dariiqa farxaddu waa in lagu helo kalsoonida aad ku qabto aqoontaada sida ay u cadahay iyo fayownimada waxbarashada. Taas laguma gaadhi karo in la akhriyo sheekooyin jacayl oo akhristaha ka fogeeysa xaqiiqada oo ay ka buuxaan riyooyin musalsal ah iyo dhalanteed wareer badan, balse keena niyad jab iyo dib u dhac. Runtii, arrintu way ka sii daran tahay taas, sida sheekooyinka Agatha Christie, oo wax ka barta

khiyaanada, dembiyada iyo dhaca. Waxaan akhriyay taxanaha cinwaankiisu yahay ‘The Best of World Fiction’, oo ah xulashada sheekooyin xiiso badan heystana abaal-marinta Nobel-ka, waxaanan ogaaday in sheekooyinkaas ay ku jiraan khaladaad badan oo halis ah iyo doqonimo aad u badan. Shaki la'aan, qaar ka mid ah kuwan ugu wanaagsan ee khayaaliga ah waxaa ka mid ah sheekooyinka qaar oo wanaagsan marka laga eego dhinaca farshaxanka kaliya iyo markaga la eego xirfadda sheeko-tabinta, sida buugga ‘The Old Man and the Sea’ ee uu qoray Earnest Hemingway, iyo sheekooyin kale oo noocaas ah oo ka fogaanaya anshax-xumada., dib u dhaca maskaxeed, iyo calaamadaha kale ee hoos u dhaca suugaaneed.

Haweeney kasta oo caqli lihi waa in ay akhridaa kutubta hiddaha suugaanta ee codkeenna (Carabi iyo Islaamba), sida kutubta at Tantaawi, al-Kilaani, al-Manfaluti, ar-Rafici iyo kuwa la mid ah, kuwa daahirka ah iyo kuwa damiirka fayow ee xanbaarsan fariimaha cad-cad. Tan waxaan u sheegay oo kaliya sababtoo ah waxaan aad u xiiseeyaa in buuggeyga uu ka xoroobo raad shisheeye, leexleexad xataa in-yar. Immisa qof ayaa dhibanayaal u noqday maqaallo ama sheekooyin ay akhriyeen. Eebbana

TIKTOK: @SmaliBookTok

waa subxaanahu wa tacaalaa. Waa midka aan raadinayno ilaalintiisa.

Arrintu siday doontaba ha ahaatee, wax ka khayr badan ma jiro qisooyinka Eebbe ku sheegay kitaabkiisa, rasuulkiisuna sunnada ku sheegay, iyo taariikhda sharafta leh ee suubanayaasha, khulafada, culimada iyo dadka dhawrsada. Ee niyad samow oo ku farax nicmada Eebe, maxaa yeelay waxaad ku mannaysantahay diintiina iyo hanuunkiina, caqiidadiina iyo dhaxalkiina.

***Dr Caa'id Al Qarni***

TIKTOK: @SomaliBookTok

TIKTOK: @SomaliBookTok

# Cutubka 1aad

TIKTOK: @SomaliBookTok

## SOO DHAWOOW!

**Soo dhawoow** Haweenay Alle ka cabsatay oo tukataa oo soomta.

**Soo dhawoow** Haweenay xikmad iyo sharaf badan oo wali ku dhagan ~Xijabkeeda.

**Soo dhawoow**, Haweenay, wax og, aad wax u akhriday oo waxna baratay.

**Soo dhawoow**, Haweenay samafal badan, aamin ah oo daacad ah.

**Soo dhawoow** Haweeneey dulqaad badan oo Alle ajar weydiista, toobad keenta oo asaga u noqota.

**Soo dhawoow** Haweenay Alle xusta oo ku mahadisa oo barida.

**Soo dhawoow** Haweenay raacday wadadii Aasiya, Maryam iyo Khadiija.

**Soo dhawoow** Haweenay hooyo u ah geesiyaal, oo soo saarta rag.

**Soo dhawoow**, Haweenay qaali ah,ilaalisana qiyamka.

**Soo dhawoow** Haweenay dhawrta xudduudka Alle oo ka fogaata waxyaalaha xaaraanta ah.

TIKTOK: @SomaliBookTok

## HAA!

**Haa** ku dheh dhoola cadeyntaada quruxda badan taas oo u direysa fariin diiran oo saaxiibtinimo dadka kale.

**Haa** ku dheh hadalkaaga naxariista leh ee dhidibada u taagaya saaxiibtinimada sida islaamku ogolyahay oo meesha ka saaraysa xumaanta.

**Haah**, ku dheh samafal la aqbali karo oo masaakiinta farxad geliya oo kuwa gaajaysan quudiya.

**Haa** ku dheh inaad la fadhiisto Qur'aanka, akhrintiisa, ka fiirsashada macnihiisa, ku dhaqankiisa, iyo toobadkeen iyo dembi dhaaf.

**Haa** ku dheh in aad xasuusato Alle oo dambi dhaaf aad ka barido, ducadana joogteeyso oo aad towbad keento.

**Haa** ku dheh ubadkaada oo aad ku barbaariso diinta islaamka, bartana sunnada, kuna hanuuniso wixii anfacaya.

**Haa** ku dheh xishoodka iyo xijaabka sida uu Alle faray, taas oo ah habka is-ilaalinta.

**Haa** ku dheh saaxiibtinimada dumarka wanaagsan ee Alle ka cabsada, Islaamka jecel, qaddarinta iyo qiimaha sare leh.

**Haa** ku dheh in la xurmeeyo waalidka, ilaalinta xiriirka qaraabada, ixtiraamka deriska iyo daryeelka agoonta.

**Haa** ku dheh inaad akhrido buugaag faa'iido leh, oo xiiso leh.

TIKTOK: @SomaliBookTok

**MAYA!**

**Maya** ku dheh in waqti lagu lumiyo damacyo aan macno lahayn, iyo jacayl aargoosi iyo muran aan waxba tarayn.

**Maya** ku dheh in laga hormariyo lacagta iyo ursiga hantida qofka caafimaadkiisa, farxadiisa, hurdadiisa iyo xasiloonida maskaxda.

**Maya** ku dheh in la raadiyo ceebaha dadka kale iyo in la xanto iyaga, iyada oo la iloobo ceebaha noo gaarka ah.

**Maya** ku dheh raaxadda jireed oo la siiyo rabitaan kasta.

**Maya** ku dheh inaad waqti ku lumiso dad aan muhiim kuu ahayn oo aad saacado ku qaadato hawlo aan faa'iido kuu laheyn.

**Maya** ku dheh in la dayaco nadaafadda jireed iyo nadaafadda guriga, iyo in guriga aan la habeeynin.

**Maya** ku dheh "cabitaanada xaaranta ah, sigaarka, narghile ("tubooyinka shiishada"), iyo dhammaan waxyaalaha xunxun.

**Maya** ku dheh in laga fikiro masiibooyinkii hore, iyo in lagu noq-noqdo khaladaadkii hore.

TIKTOK: @SomaliBook1ok

**Maya** ku dheh in la is-ilowsiiyo aakhiro oo la dayaco in lagu dadaalo, iyo inaan laga taxadarin waxa dhici doona aakhiro.

**Maya** ku dheh in ay lacag ku lumiyaan, ku xad-gudbida waxyaalaha aan bannaanayn, iyo inaad cibaadada ka gaabiso.

TIKTOK: @SomaliBookTok

## TABAN FIKIR OO AY TAHAY INAAD KU FIKIRTO

1. Xusuusnow in Eebahaa uu u dambi dhaafo kuwa u dambi dhaaf warsada, uuna ka toobad aqbalo kuwa toobad keena, kuwa u soo noqdana ka aqbalo.
2. Kuwa itaalka daran u naxariiso, waanad farxi doontaa; Masaakiinta wax sii, waad bogsan doontaa; ciil ha u qaadan qof, waad caafimaad qabi doontaa.
3. Wanaag filo, Maxaa yeelay Allaah ayaa kula jira, Malaa'igtuna dambi dhaaf bay kuu baryaysaa, Jannatul firdowsana way ku sugaysaa.
4. Illintaada iska masax, si fiican uga fikir Eebahaa, iskana eri walwalka adigoo xasuusan nimcooyinka Alle kugu manaystay.
5. Ha u malayn in dunidan ay jirto cid ay u qumman tahay. Ma jiro qof dhulka korkiisa jooga oo hela waxa uu rabo ama ka xoroobay dhib kasta.
6. Noqo sida geed dheer oo ujeeddooyin sare leh; haddii dhagax lagu soo tuuro, si fudud midhihiisa u daadsha.
7. Weligaa ma maqashay in murugadu soo celiso wixii la waayay, ama welwelku saxo khaladaadka? Haddaba maxaa kugu sababay murugada iyo werwerka?
8. Ha filanin fitno iyo balaayo, ee waxaad filataa nabad, badqab iyo caafimaad, hadduu Eebbe idmo.

TikTok: @SoftiaBookTok

9. Qalbigaaga ka demi ololka nacaybka, adoo cafinayo qof kasta oo ku xumeeyey.
10. Qaweeska, Weesada, Cadayga iyo is-hagaajintu waa dawooyin wax ku ool u ah dhammaan noocyada walbahaarka iyo welwelka.

TIKTOK: @SomaliBookTok

**KA FIKIR…**

1. Noqo sida shinnida oo kale, taasoo ku soo degta ubaxyo udgoon iyo laamo cusub.
2. Ma haysatid wakhti aad ku raadiso ciladaha dadka iyo khaladaadkooda.
3. Hadii Alle kula jiro yaad ka cabsanaysaa? Hadduu Eebbe kaa horimaaddana rajo noocee haysataa?
4. Dabka xaasidnimada ayaa jidhka baabbi'iya, oo hinaaso badanuna waa sida dab ololaya oo kale.
5. Haddaadan maanta diyaargaroobin, berrito waxba ma qaban kartid.
6. Si nabad ah uga guur meelaha ay ka socdaan doodaha aan muhiimka ahayn.
7. Akhlaaqdaada iyo usluubtaada ha ka sii qurux badnaadaan beerta.
8. Samee ficillo naxariis leh, waxaadna noqon doontaa qofka ugu farxadda badan dadka.
9. Dadka u daa kooda abuuray, xaasidkana u daa dhimashada, cadawgaagana iska illow.
10. Ku raaxaysiga camalka xaaraanta ah waxa ka dambeeya qoomamo, khasaare iyo ciqaab.

TIKTOK: @SomaliBookTok

TIKTOK: @SomaliBookTok

32/296 PAGES
Buugga oo dhameystiran
ka dalbo:-
0619867747
0613669987

ama waxaad ka heli kartaa
Madbacadda jaabir Printing Press
ama wac 0618037213

